LÄNSSTYRELSEN
VÄSTRA GÖTALANDS LÄN

SLU
Sveriges lantbruksuniversitet

Havs och Vatten myndigheten



# Kalluunka laga helo meelaha qabowga ah, xeerarka kalluumaysiga iyo bayoolajiga

Kani waxaa uu sharxayaa sida uu u nool yahay kalluunka laga helo meelaha qabowga iyo sida saxda ah ee loo kalluumaysto

Kalluunka laga helo meelaha qabowga ah waxaa ay had iyo jeer u ahaayeen qayb dhexe nolosha xeebta Bohus. Taariikh ahaan, mid ka mid ah qabashadii ugu muhiimsanayd halkan waxaa uu ahaa kalluunka meelaha qabowga ah laga helo. Tan iyo 1970kii, si kastaba, qabsashadan aad ayay hoos ugu dhacdey (Jaantuska) ganacsiga kalluumaysiga kalluunka meelaha qabowga ah laga helo ee xeebta dhammaan waa dabar go'ay. Marka kalluunka meelaha qabowga ah laga helo uu u muuqday in uu baaba'ayo ka dib 2000, cilmi-baaris xooggan ayaa la bilaabey. Tani waxaa ka dhashey in si fiican loo fahmo sifada gaarka ah ee kalluunka badda waxayna keentay in la soo rogo xeerar cusub iyada oo la isku dayayo in la dhawro kalluunka meelaha qabowga ah laga helo ee jira.




Jaantuska 1aad. Celcelis ahaan qabsashada kalluunka ee kalluunka meelaha qabowga ah laga helo (kg) saacad shabaq tuurasho kasta ee Sweden tuurashada shabaqa aargoosatada ee Skagerrak/Kattegat 1978-1999.

Si kalluunka meelaha qabowga ah laga heli iyo kalluumaysiga ay u jiraan mustaqbalka, waa muhiim in kalluumaysiga loo sameeyo si dhawraysa kalluunka. Waxaan u baahanahay xeerar kalluumaysi khuseeya oo la xushmaynayo. Xeerarka kalluumaysiga ee la sameeyay si loo ilaaliyo marxaladaha ugu muhiimsan ee heerarka isbeddelka nolosha ee kalluunka meelaha qabowga laga helo oo loo maamulo qaddarka kalluumaysiga si looga fogaado in la dhimo tirada kalluunka. Waxaa jiraya waxyaabo badan oo laga faa'iidayo, oo ah mid maaliyadeed iyo mid deegaanba, haddii tirada kalluunka meelaha qabowga ah laga helo dib u soo noolaado maadaama bulshada ay ka hesho faa'iido badan kaydka kalluunka ee caafimaadqabka ah.

Buugyarahan waxaa loogu talo galay gaar ahaan dadka qorsheynaya in ay ka kalluumaystaan kalluunka meelaha qabowga ah laga helo ee xeebta galbeedka, iyo in badan guud ahaan kuwa doonaya in ay wax badan ka bartaan kalluunka meelaha qabowga ah laga helo iyo bayoolijigiisa.

## Waa maxay kalluunka meelaha qabowga ah laga helo?

kalluunka meelaha qabowga ah laga helo waa kalluun. Ereyga kalluun waxaa loola jeedaa lafdhabarleyda biyaha ee

markasta leh waafyo, dhiig-qabow iyo lafdhabar. Kooxda kalluunka waxaa uu hormaray muddo waqti dheer oo xad-dhaaf ah, taas oo aasaasi u ah fahanka kala duwanaanta u dhaxeeya bahyada iyo sinjiyada kala duwan.

Bahda kalluunka meelaha qabowga ah laga helo waxaa ku jira dhawr sinjiyo. Midka ugu caansan ee sida fiican loo yaqaano malaha waa kalluunka meelaha qabowga ah laga helo. Kalluunka kale ee caadiga ah ee bahda kalluunka meelaha qabowga ah laga helo waa whiting, had-dock, kalluun dhuxul, ling iyo pollack.

Kalluunka meelaha qabowga ah laga helo waa kalluun adag oo leh awood weyn oo uu kula qabsanayo deegaamada kala duwan. Waxaa uu ku nool yahay biyaha leh milixda kala duwan, heer-kulka kala duwan iyo gun dhaadheer oo kala duwan. Marka la eego dabeecadda, kalluunka meelaha qabowga ah laga helo waa mid aad u kala duwan waxaa uuna si degdeg ah u beddelayaa deegaankiisa marka loo baahdo. Kalluunka meelaha qabowga ah laga helo waxaa loo diiwa-angeliyay sida in uu socda ilaa 700 oo mitir mool ah in ka yar hal saac, tusaale ahaan. Waxaa jira kala duwanaansho gaar ah oo weyn oo u dhexeeya kal-luunka; qaar ka mid ah waxay joogaan biyo aan sii xulnayn, qaar kalena biyo aad u xulan qaarna waxay si joogto ah isaga beddelaan gun-dheerida. Kal-luunka meelaha qabowga ah laga helo ee xeebta, si kastaba, inta badan waxaa uu ku nool yahay meel u dhow gunta waxaa uuna doorbidaa degaamada leh dhirta kala duwan.

Kalluunka meelaha qabowga ah laga helo waxaa uu kori karaa ugu yaraan ilaa 180 sm qaar la qabteyna waxaa lagu mii-saamey in ka badan 50 kg.

## Bayoolijiga kalluunka meelaha qabowga ah laga helo

Kalluunka meelaha qabowga ah laga helo ee xeebta Bohus waxay sinji ahaan ku baaluqayaan cabbirka gaaraya 35-60 sm waxayna tarmayaan inta u dhaxeysa Diseembar/Jannaayo ilaa Abriil. Kal-luunka meelaha qabowga ah laga helo ee weyn waxaa uu dhalaa ukumo dhawr jeer inta lagu guda jiro xilliga uu ukunta siideynayo, oo ah la qabsashada kordhi-naysa jaaniska ugu yaraan in ukumaha qaar ay ku dillaacaan xaaladda deega-anka saxda ah.

Kalluunka meelaha qabowga ah laga helo waxaa uu leeyahay da-beecad tarmid gaar ah, oo inta lagu guda jiro labka waxay shukaansadaan dheddiga iyaga oo sameynaya dhaqdhaqaaqa dheel yar, iyada oo kor u dabaa-lanaya ka dibna ku sameynaya wareegyo du-sha. Dheddiga waxay xula-nayaan rafiiq ka dib dhawr ”dheel” ugaxda



Kalluunka meelaha qabowga ah laga helo.
*Sawirka: Lars Molander*




Jaantuska 2. Labajibbaarada buluugga ah waxay calaamad u yihiin kaydadka kalluunka meelaha qabowga ah laga helo ee maxaliga ah ee ugunta siidaaya ee la aqoonsadey.

kalluunka iyo shahwada ayaa la siidaaya waxayna si xor ah ugu sabbeynayaan biyaha. Kalluunka meelaha qabowga ah laga helo waxaa uu dhallaa ukumo badan, oo sidoo kale ah la qabsasho si ukumaha qaar ay u helaan xaaladaha saxda ah ee la xiriira hirarka iyo wixii la mid ah. Koriinka ukunta waxaa saameeya heerkulka biyaha, kaas oo go'aaminaya sida dhaqsiyaha badan ee ay u baaluqaan. Ukumaha iyo goorta dambe dirxiga ayaa ka dib waxaa qaada biyaha hirka oo geeya meelo kala duwan.

Marka dirxiga uu noqdo kalluun yar, waxay u dabaashaan gunta hoose halkaas oo ay ka heli karaan ilaalin ka dibna ku kori karaan. Marxaladdaan ee nolosha kalluunka meelaha qabowga ah laga helo si dhaqso ah ayuu u koraa waxaa uu ku gaari karaa 30-35 sm laba sano gudahooda Skagerrak/Kattegat waxaa uuna galmo ahaan ku baaluqaa da'da 2-4 sano jir. Ka dib marka uu gaaro da'da galmo ahaan uu ku baaluqo, kalluunka meelaha qabowga ah laga helo mabda' ahaan waxaa uu siidayaa ukun sannad kasta.

## Kala qaybsanaanta juqraafi iyo doorashada deegaanka u gaarka ah

Kalluunka meelaha qabowga ah laga helo waxaa laga helaa badda Baltic, Öresund, Kattegat iyo Skagerrak. Taariikh ahaan, kalluunka meelaha qabowga ah laga helo waxaa lagu tiriyey in uu yahay hal kayd, oo ah, dhammaan kalluunka meelaha qabowga ah laga helo waa iskumid. Tani macneheedu waa in kalluumaysiga, ilaa iyo hadda sida lala qabatimey, in xoogga la saaro kaydka guud iyo in kaydka maxaliga ah aad loo

dhammeeyay marka loo eego kuwa kale. Waxaan hadda ognahay in ay jiraan kaydad kalluunka meelaha qabowga ah laga helo oo kala duwan kuwaas oo la qabatimey muddo ka dib bay'ada gobolka/degaanka.

Ugu horrayn waa kaydadka xeebta midka hadda hoos ugu dhaadhacay heerka xaalad khatarteeda leh, iyada oo kalluunka meelaha qabowga ah laga helo badda ee doolka ah ay ka muuqato calaamado soo kabasho. Aagga xeebta Skagerrak, waxaa ka jira/ka jiray tiro badan ee ah kaydka ukun siideyn kala duwan (Jaantuska 2aad). Kaydkaan waxaa loo tixgeliyaa in ay yihiin kuwo taagan, taas oo ka dhigtay in ay xasaasi u yihiin kalluumaysiga aadka ah. Sannadada qaar waxaa sidoo kale jira qulqul badan oo ah kalluunka meelaha qabowga ah laga helo oo da'yar oo ka imaanaya kaydka badda hoose ah ee Kattegat iyo Badda Waqooyi. Kalluunkan guud ahaan mar kale ma haajirayo ka hor inta aysan gaarin baaluqid, mararka qaar waxay keentaa in la gaaro go'aan qaldan oo ah in kaydka kalluunka meelaha qabowga ah laga helo in uu soo kabsaday oo uu soo noqday.

Xeebta Bohus kaydka maxaliga ah ee ukunta siideynaya ayaa lagu aqoonsadey Bottnafjorden, Bro/Åbyfjorden, Gullmaren iyo biyaha ku hareersan Orust iyo Tjörn.

## Sinjiyada kale ee kalluunka laga helo meelaha qabowga ah

### Kalluunka whiting

Kalluunka whiting waxaa laga helaa xeebta galbeed ee Sweden oo dhan iyo sidoo kale Öresund iyo galbeedka Badda Baltic. Waxaa uu ku nool yahay meel ka sarreysa gun-badeedda dhoobada-bacaadka ah ee dhererka gunteeduna ay tahay 5-70 m waxaa uu kori karaa ilaa 70 sm dherer ah iyo miisaan gaaraya ilaa 3 kg.

### Kalluun dhuxul


Kalluun dhuxul.
*Sawirka: Lars Molander*

Kalluun dhuxul waxaa inta badan laga helaa xeebta galbeed ee Sweden oo dhan waxaana si teel-teel ah looga helaa Öresund iyo Badda Baltic. Kalluun dhuxul sida caadiga ah waa kalluun badan oo wada socda waxaa uu ku nool yahay joog-u-taxyada biyaha oo dhan (laga bilaabo dusha ilaa gubbadeedda). Waxay ka dheeraan karaan hal mitir miisaankoodana waxaa uu ka badan karaa 20 kg. Kalluun dhuxulka da'da yar waxaa uu ka imaadaa kaydka unkunka siidaaya ee Badda Waqooyi.

## Kalluunka pollack

Kalluunka pollack waxaa laga helaa xeebta gableed ee Sweden oo dhan, laga bilaabo dusha ilaa hoos 200 mitir. Si ka duwan kalluunka laga helo meelaha qabowga ah, kalluunka pollack inta badan waxaa uu ku nool yahay biyaha furan ee ma aha salka. Kalluunka pollac waxaa uu koraa ilaa 130 sm miisaankiisana waxaa uu ka badan karaa 20 kg.

Waxaa jira waxyaabo badan oo muujinaya in kalluunka pollack, sida kalluun meelaha qabowga laga helo ahan, uu ka kooban yahay tiro ka mid ah kaydka maxaliga ah, laakiin kaydka hadda waxaa laga baabi'iyey Skagerrak iyo Kattegat.

## Kalluunka haddock

Kalluunka haddock waxaa intiisa badan laga helaa Skagerrak, Kattegat iyo Öresund, waxaana si teelteel ah looga helaa Badda Baltic. Kalluunka haddock waxaa uu ku nool yahay gun-badeedka (10-200 mitir gun gaaraya) oo waxaa uu noqon karaa ilaa hal mitir dherer ah iyo miisaan 20 kg ah.

## Kalluunka ling

Sweden, kalluunka ling waxaa laga helaa laga bilaabo Öresund ilaa waqooyiga. Macluumaadka ku saabsan kalluunka ling ee biyaha Sweden waa uu liitaa, balse waxaa la aaminsan yahay in kaydka hoos u dhac ku yimid iyada oo sabab u

Kalluunka pollack. *Sawirka: David Solstorm*



Kalluunka haddock. *Sawirka: Johan Wagnström*





Kalluunka ling. *Sawirka: Lars Molander*

ah kalluumaysiga aadka ah. Waa sinjiyada gun-badeedka midka kori kara ilaa dhererka 2 mitir iyo miisaan ka badan 50 kg. Kalluunka ling sida caadiga ah waxaa uu ku nool yahay biyaha xulan ama moolka ah (100-400 mitir). Waqti hore oo ah 1860kii, ayaa kaydka loo tixgeliyay in aad ugu yar yihiin Kattegat iyo Skagerrak, sidaa awgeed kalluumaysatada Bohus waxay doon ugu safri jireen masaafo dheer ee biyaha ku harreersan Shetland.

## Guud ahaan kalluumaysiga iyo xeerarka

Kalluumaysiga kuma jirto xuquuqda dadweynaha, waxaana had iyo jeer lagu saleeyaa fikradda ah in qof uu iska leeyahay xuquuqda kalluumaysiga. Badda iyo shanta haro, ku kalluumaysiga qalabka kalluumaysiga gacanta lagu qabto waa mid u bannaan qof kasta, inkasta oo ay jiraan xadad iyo mas'uuliyad shaqsi oo cad. Xeerarka kalluumaysiga waxaa loogu talogalay in lagu dhawro kaydka iyo in lagu hubiyo in ay leeyihiin xaal waara. Taas macnaheedu waa in kaydka loo hayo jiillalka mustaqbalka iyo in ay awoodaan in ay ka badbaadaan kalluumaysiga la oggol yahay.

Waxaa jira tiro mabaadii' waaweyn oo lagu darey xeerarka kalluumaysiga. Gaar ahaan sinjiyada dabar go'aya iyo/ama kaydka xaasaasiga ah waxaa lagu maamulaa aagga xaddidaadda leh iyo aaggag manuuc ah. Xilliyada la xiro waxaa loogu talogalay in la ilaaliyo kalluunka marka ay gaar ahaan xasaasi yihiin. Baaxadda ugu yar ayaa la adeegsadaa oo ka sarreeya wax kasta in loo oggolaado kalluunka in uu tarmo ka hor

inta aan la qaban. Xaddad qabasho ayaa la sameeyay si loo hubiyo in guud ahaan kaydka uusan dabar go'in.

Aagga daryeelka ama ilaalinta ee ku harreersan Brofjorden, waxaa loo oggol yahay ugu badnaan saddex kalluun in uu kalluumaysto kasta uu ka qaato wadarta kalluunka uu qabto ee ah kalluun meelaha qabowga ah laga helo, haddock iyo pollack.




Aaggaga ka jira mamnuucidda kalluumaysiga la isticmaalayo shabaqada ee ka gun dheer 10 mitir

Hadaad rabto macluumaad faahfaahsan, u noqo xeerarka Hay'adda Kalluumaysiga (FIFS 2004:36).

## Xeerarka kalluumaysiga ee kalluunka meelaha qabowga ah laga helo iyo sinjiyada la xiriira

Kalluumayisga jinsiyada kalluunka meelaha qabowga ah laga helo waxaa hadda lagu maamulaa qalab la oggol yahay, xilliyada la xiro, aaggaga xaddidaadda leh ee la dhawro, cabbirka ugu yar iyo tirooyinka qabashada.

Badda, ku kalluumaysiga qalabka kalluumaysiga gacanta lagu qabto waa u banaan tahay qof kasta. Tani waxaa loola jeedaa in dadka Iswiidhishka ah iyo ajaaniibta ay xaq u leeyihiin in ay ku kalluumaystaan qalabka kalluumaysiga gacanta lagu qabto. Qalabka kalluumaysiga gacanta lagu qabto waxaa loola jeedaa ulaha lagu kalluumaysto, callaalka iyo qalab dhaqaaqa ee la mid ah oo ku qallabaysan xarig iyo ugu badnaan 10 jillaab.

Cabbirka ugu yar ee kalluunka meelaha qabowga ah laga helo ee lagu qabto qalabka kalluumaysiga gacanta waa 30 sm. Kalluunka kale ee bahda meelaha qabowga ah laga helo, ma jiro cabbirka ugu yar marka lagu kalluumaysanayo qalabka kalluumaysiga gacanta lagu qabto.

Inta lagu guda jiro muddada laga bilaabo 1da Oktoobar ilaa 31 Maarso, waa mamnuuc in laga kalluumaysto dhammaan aaggaga xaddidaadda leh (eeg buugyaraha xeerarka Kalluumaysiga Badda).

Inta lagu guda jiro muddada laga bilaabo 1da Jannaayo – 31 Maarso, waa mamnuuc in laga kalluumaysto kalluunka meelaha qabowga ah laga helo, pollack ama haddock gudaha xadka shabaqa

kalluunka lagu tuurto.

Aagga la ilaaliyo ee Gullmarsfjorden, waa mamnuuc in laga kalluumaysto kalluunka meelaha qabowga ah laga helo, pollack ama haddock sannadka oo dhan.

Aagga la ilaaliyo ee sideedda fjords, waa mamnuuc in laga kalluumaysto kalluunka meelaha qabowga ah laga helo, pollack ama haddock sannadka oo dhan (Jaantuska 3aad). Waa la oggol yahay in laga kalluumaysto aagga cas sinjiyada kale iyada oo la adeegsanayo qalabka kalluumaysiga gacanta lagu qabto. Aagga buluugga ah waxaa la oggol yahay in laga kalluumaysto iyada oo la joogo dhulka Orust iyo dhulweynaha inta lagu



guda jiro muddada laga bilaabo 1da Abriil ilaa 30ka Sibteembar.

## Siideynta kalluunka

Xasuusnow in kalluunka la qabto ee la siidaayo ay tahay in uu noolaado. Gacan ku qabashada kalluunka la qabto ee la siideynayo ee aan loo baahnayn oo dhan sidaa awgeed waa sharci-darro. Tani waxaa ka mid ah dib-u dhacyada sababta u ah sawir-qaadidda iyo miisaamidda. Ula dhaqan kalluunka si taxaddar leh:

- Yaree waqtiga kalluunka uu hawada qaadanayo. Haddii ay suurtagal tahay, bixi jillaabka ku jira biyaha
- Iska ilaali ciyaarta dheer ee aan loo baahnayn
- Haku qabanin kalluunka gacmo qalalan
- Isla ilaala qabashada aan loo baahnayn ee kalluunka la mamnuucay waxaadna joojisaa kalluumaysiga oo beddel goobta aad joogto haddii aad hal goob ka qabato kalluun badan oo kuwa la mamnuucay ah.

## Kormeerka kalluumaysiga

Kantaroolka iyo kormeeridda kalluumaysiga waxaa sameeya dhawr maamulo. Guddiga Maamulka Degmada waxaa uu kormeerayaa kalluumaysiga isaga oo adeegsanay tiro saraakiil kalluumaysi oo ay magacaabaan, kuwaas oo si gaar ah u kantaroolka kalluumaysiga xeebta ee madadaalada. Ciidamada ilaalada xeebta waxay xoogga inta badan saaraan ganacsiga kalluumaysiga badda, iyada oo Hay'adda Sweden ee Maareynta Biyaha




Jaantuska 3aad. Aagga la ilaaliyo ee sideedda fjords waa ka mamnuuc in la kalluumaysto kalluunka meelaha qabowga ah laga helo, pollack ama haddock sannadka oo dhan.

iyo Badda ay fuliso maamulka iyo kontaroolka imaanshaha xeebaha doomaha ka ganacsada kalluumaysiga. Ciidanka Booliska Badda waxay leeyihiin doorka dhawridda sharciga iyo in ay wax ka qabtaan fal-dembiyeedka laga shakiyo.

## Jebinta xeerarka kalluumaysiga

Jebinta xeerarka kalluumaysiga waxaa lala macaamilaa iyada oo loo marayo xeerilaalinta guud waxaana ka dhalan kara ganaax ama xabsi. Qalabka kalluumaysiga ayaa la qaban karaa oo lala wareegi karaa. Haddii aad aragto wax khilaafaya xeerarka dhaqangalka ah, la xiriir mid ka mid ah maamulada hoos ku xusan.

Waxaan rajeynaynaa in galkaan uu waxtar u lahaa fahankaaga kalluunka meelaha qabowga ah laga helo iyo sinjiyada la xiriira iyo sababta ay u jiraan xeerarka kalluumaysiga. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xeerarka kalluumaysiga hadda, u noqo mareegtooyinka Guddiga Maamulka Degmada ee degmada Västra Götaland, Hay'adda Sweden ee Maareynta Biyaha iyo Badda ama www.svenskafiskeregler.se.

www.lansstyrelsen.se/vastragotaland

www.havochvatten.se

www.svenskafiskeregler.se

Dhammaan macluumaadka ku qoran halkaan waa sax waqtiga la daabacayo. Xasuusnow in xeerarka kalluumaysiga ay yihiin kuwo had iyo jeerba isbeddela. Xaaladaha sharciga ah, daabacadda asal ahaan loo daabacey ee sharciyada ku habboon ayaa lagu dabaqaa. Kalluumayste kasta waxaa ku waajiba in uu oggaado xeerarka ku habboon aagga kalluumaysiga ee wax la iska wayddiinayo.

Buugyarahan waxaa soosaarey Guddiga Maamulka Degmada ee degmad Västra Götaland isaga oo kaashanaya Jaamacadda Cilmiga Beeraha ee Sweden iyo Hay'adda Sweden ee Maareynta Biyaha iyo Badda.

## Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan kala xiriir mid ka mid ah maamuladan soo socda:

**Länsstyrelsen (Guddiga Maamulka Degmada)**
010-224 40 00
www.lansstyrelsen.se/vastragota-land

**Kustbevakningen (Ciidanka Ilaalada Xeebta)**
031-727 91 00
www.kbv.se

**Havs- och Vattenmyndigheten (Hay'adda Sweden ee Maareynta Biyaha iyo Badda)**
010-698 60 00
www.havochvatten.se

**Polisen (Booliska)**
114 14

Soo-Saaridda: Guddiga Maamulka Degmada ee degmad Västra Götaland isaga oo kaashanaya Jaamacadda Cilmiga Beeraha ee Sweden iyo Hay'adda Sweden ee Maareynta Biyaha iyo Badda | 010-224 40 00 | Daabacaada: 2017
www.lansstyrelsen.se/vastragotaland | Cover photo: Lars Molander



*Sawirka: David Solstorm*

LÄNSSTYRELSEN
VÄSTRA GÖTALANDS LÄN

SLU
Sveriges lantbruksuniversitet

Havs och Vatten myndigheten